



Barnaamijyada masuuliyadda ranjiga ee PaintCare wuxuu siiyaa ganacsadayaasha ranjiga qaabab habboon oo ay dib ugu warshadeeyaan si sax ahna u nidaamiyaan hadhaaga ranjiga.

Soo saarayaasha rinjiga waxay suuragalinayaan in si wanaagsan dib loogu warshadeeyo rinjiga haraadiga ah iyaagoo goobo lagu aruuriyo rinjiga haraadiga ah laga sameeyay gobalada qaarkood iyo deegaanka Kolonbiya ("Gobalada PaintCare") iyadoo ay jiraan shuruucda rinjiga la xiriirta kaas oo u saamaxaya qoysaska iyo ganacsiyaduba in ay rinjiga haraaga ah ku qaataan lacag la'aan.

Maalgalinta mashaariicdan waxay ka timid lacagaha laagaa qaado dhismayaasha rinjiga isticmaala (guri rinjiyaynta, midabaynta iyo xardhidda).

Masuuliyadda Ranjiga

Ahdaafta ugu muhiimsan ee barnaamijyada masuuliyadda ranjiga waa in yareeyo khasaaraha ranjiga oo la bixiyo habdhis bey'ad ahaan fiican kharash ayaan macquul ah maaraynta hadhaaga ranjiga. Barnaamijka waxaa dajiyay oo kuna shaqeeya PaintCare, oo ah urur aan macaash doon ahayn oo ay sameeyeen Ururka Dahaadhada Maraykanka (American Coatings Association (ACA)).

PaintCare (Waaxda Rinji Dhaqaalayntu) waxay barnaamijyo ka fulisaa Kalifoorniya, Kolorida, Konectikat, Deegaanka Kolombiya, Mayn, Minisoota, Oregon, Hoon Islaandhi, iyo Fermonti.



Khidmadaha iyo Maalgalinta

Sida ay qabaan shuruucda gobaladan, kharashka (loo yaqaano "PaintCare" ama kharashka rinji dhaqaalaynta) waa in ay soo saarayaasha rinjiga ku daraan qiimaha lagu gadayo rinjiyaynta dhismayaasha ee lagu dhex iibiyo gobalka. Kharashkaasu wuxuu u dhexeeyaa \$0.35 ilaa \$1.99 waxayna ku kala duwanyihiin balaca konteenarka iyo gobalka la joogo hadba.

\$0.35 - \$0.49: Konteenarada yaryar (tusaale, bintis iyo quartis)

\$0.75 - \$0.99: Konteenarka cabirka dhexe (tusaale, 1 galoon)

\$1.60 - \$1.99: Cabirada waaweyn ee ilaa 5 galoon

Fadlan booqo paintcare.org/fees si aad wax badan uga ogaato qiimaha khaaska ah ee gobalkaaga.

Kharashka waxaa PaintCare siiya riji soo saarayaasha si loogu maalgaliyo samaynta goobo laga qaado, dib loogu warshadeeyo si wanaagsana looga nadiifiyo. Khidmadaha sidoo kale waxa lagu kharash gareeyaa waxbarashada macmiilka iyo maamulka barnaamijka.

Sharcigu sidoo kale wuxuu dhigayaa in dhammaan qaybiyayaasha iyo tafaariqlayaashu ay ku daraan khidmadda PaintCare qiimahaaga iibka ranjiga ay ka iibiyaan gobolka.

TALASOOJEDINTA QANDARAASLAYAASHA

Diyaarinta Qiimaynahaaga

Marka ay qiimaynayaan shaqooyinka, ganacsadayaashu waa inay xisaabta ku darsadaan khidmadahan iyaga ka hubinaya qaybiyayaasha inay hubiyaan qiimayaasha ranjiga inay ku dareen khidmadda.

Isku Dhaafi Khidmadaha Macaamiishaada

PaintCare waxay soojeedinaysaa in ganacsadayaasha rinjiga isku dhaafiyaan khidmadaha macaamiishooda si ay uga kabsadaan khidmadaha ay bixiyeen. Sidoo kale waa inaad u oggolaato macaamiishaadu inay ogaadaan inaad ku darayso khidmadahan qiimayaashada.

Goobaha lagu Dejinayo Ranjiga

PaintCare waxay ka aas'aastay gobal kastoo leh PaintCare goobo rinjiga loogu talagalay iyadoo looga danleeyahay hadafka iyo goobaha rinjiga boqolkiiba 90-95 ay isu jirsadaan 15 mayl (24.14km) gobal kasta.

Intooda badan goobaha lagu dejiyo waa bakhaarro ranji. Meelaha kale waxa kamid ah saldhigyada wareejinta khashinka, xarumo dib-u-warshadayn, iyo barnaamijyada khashinka qoyska ee halista ah oo dawladdu masuul ka tahay. Kaga qayb qaadashada goob lagu dajiyo waa mutadawacnimo. Si aad u hesho goob lagu dejiyo, booqo websaytkayaga.

Goobaha lagu dejinayo ranjiga ee si habboon ugu yaala gobolladooda, cid kastaa waxay ku dejin kartaa dhawr gallon oo hadhaa ah, ranji aan la rabin ah sannadka oo dhan. Ganacsadayaal badan oo ku sugan gobollada PaintCare waxay sheegaan inay banneeyeen meelahaoga kaydka oo ayna joojiyeen ururinta faraha badan ee ranjiga. Qaar kale waxay sheegeen inay ku faraxsan yihiin inay jawaab helaan marka macmiilkoodu waydiiyo waxa lagu sameeyo ranjiga duugga ah ee aan anfacayn, ayna ku taliyaan in macaamiishoodu isticmaalaan goobaha lagu dejinayo, sidoo kale.

Isticmaalka Ganacsiyada ee Goobaha Dejinta Ranjiga

Ganacsiga sameeya wax ka yar 220 oo boondhi (99.79kg) oo ah wasakhda dhibaataada keenta* bishii waxay keeni karaan rinjiga haraaga ah ee saliida ama biyuhu ku jiraan (iyadoo ay jiraan xadidaado cadadka ranjiga ay saliiddu ku jirto). Kahor booqashada saldhigyada wareejinta iyo barnaamijyada khashinka halista leh ee qoyska, hore u sii hubi, sababtoo ah kuwan oo dhan uma adeegaan ganacsiyada waxaana dhici karta inay yeeshaan xannibaado dheeraad ah.

Ganacsiga sameeya wax ka badan 220 boondhi (99.79kg) ah wasakhda khatarta ah bishii waxay isticmaali karaan Goobaha rinjiga PaintCare ee rinjiga la keeno iyagoo keeni kara kaliya rinjiga biyaha leh; looma ogala in ay isticmaalaan goobaha loogu talagalay rinjiga ay saliiddu ku jirto.

**220 pounds (99.79kg) waa qiyaastii 20-30 galoon (75.71 – 113.56 litir) oo ranji ah. Marka uu ganacsigu xisaabinayo inta ay la egtahay wasakhda khatarta ah ee ay soo saaraan, waxaa la xisaabiyaa rinjiga saliiddu ku jirto (maxaa yeelay sharciyan kaas ayaa ah wasakh khatar leh) laakiin rinjiga latakis (iyo rinjiyada kale ee biyuhu ku jiraan) looma xisaabiyo wadarta 220 boondhi (99.79kg) bishii.*



Adeegyada Qaadida Xaddiga Badan

Ganacsiga keena ugu yaraan 200 oo galoon (757.08 litir) oo macmiilka ka soo hara oo ay dib u warashadaynayaan waxay codsan karaan in rinjigooda ay lacag la'aan ugu qaado PaintCare. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan ama aad u codsato ballan, fadlan booqo websaytkayaga, ama nagula soo xidhiidh taleefan ama iimayl.

Waa Maxay Waxsoosaarka la Daboolayaa?

Waxsoosaarka la aqbalo goobaha ku dejinta PaintCare waa isla waxsoosaarka lahaa khidmad marka la iibinayo.

Waxsoosaarka PaintCare waxaa ku jira rinjiga gudaha iyo banaanka dhismaha kaas oo loo gado konteenar ahaan kaas oo gaarsiisan 5 galoon (18.93 litir) ama ka yar. Si kastaba ha ahaatee, kama mid aha waxyaabaha la buufiyo (qasaacadaha buufinta), dayactirka warshadaha (IM), soo saaraha qalabka asalka ah (OEM) ama dahaadhada gaarka ah.

WAXSOOSAARKA PAINTCARE

- ◆ Ranjiyada nashqadeed ee gudaha iyo dibadda: ranjiga biyaha leh, akrilik, biyo leh, alkayd, saliid leh, enamel (oo ay kujiraan dahaadhada qallafsan)
- ◆ Xardhidda alwaaxyada, rinjiyaynta sagxadaha
- ◆ Buugaagta tilmaanta ah, siilariska, hoosdahaadhyada
- ◆ Midabyada
- ◆ Rinjiga cidiyaha, rinjiga indhakuusha, rinjiga wax lagu xardho, iyo rinjiga koolada
- ◆ Shubka biyuhu aanay galin/masanariga/xidhiyaasha qoryaha iyo waxyaalaha rebellantiska ah (maya mid uu kujiro daamur)
- ◆ Dahaadhada birta, kahortaggayaasha daxalka
- ◆ Ranjiga sagarada iyo daaqa

WAXSOOSAARKA AAN LAHAYN PAINTCARE

- ◆ Tiinarrada ranjiga, miniraal isbiritis, milayaasha
- ◆ Ranjiyada buufinta (Qasaxa buufinta)
- ◆ Ranjiyada baabuurta iyo gaadiidka badda
- ◆ Ranjiyada farshaxanka iyo qurxinta
- ◆ Isku dhisyada Kawl, iboksis, xabagta, iyo ku dhagayaasha
- ◆ Wanaajiyayaasha ranjiga, midabeeyayaasha, midabyo kala duwan, xabagaha
- ◆ Xafidayaasha qoryaha (ay kujiraan cayayaan dile)
- ◆ Qaybta saqafka iyo dayactirka
- ◆ Asfaalt, waxsoosaarka daamurku kujiro
- ◆ Dahaadh 2 shay ka kooban
- ◆ Nadiifiyaasha dhakada
- ◆ Ranjiyada gaadiidka iyo calaamadinta waddooyinka
- ◆ Dahaadhada Dayactirka Warshadeed (IM)
- ◆ Soosaaraha Qalabka Asalka (OEM) (dalabka tukaanka) ranjiyada iyo qurxinta